

Qaabdhismeedka Istrategiyada



Te Korowai
Whetū
Social Cohesion


Social Cohesion Guide

Social cohesion Aotearoa New Zealand

Dukumintigaan waxay bixisaa qaab lagu cabirayo hormarka ku aadan natiijooyinka ama natiijada aan rabno inaan ka aragno social cohesion ee Aotearoa New Zealand. Hormarinta social cohesion waxay noo dhaweyneysaa gaarista yoolkeena guud ama hamilada Aotearoa New Zealand meesha “dadka, qoysaska, whānau iyo bulshooyinka ay kuwada kobcayaan”.

Waan ogaaneynaa haddii aan ka sameeyneyno hormar wanaagsan social cohesion iyada oo la qiimeeynayo shaqada aan sameeyneyno inagoo u mareyno shantaan bayaano ee natiijada xigta:

1. Dadka, whānau iyo bulshooyinka way isku xiranyihiin oo waxay dareemaan inay ka mid yihiin
2. Dadka, whānau iyo bulshooyinka waxay rabaan oo u suurto galeyso inay ka qeybqaataan
3. Dadka, whānau iyo qoysaska waa lagu daray oo waxay la kulmeen sinnaan
4. Dadka, whānau iyo bulshooyinka way aqoonsanyihiin cida ay yihiin oo way is ixtiraamaan
5. Dadka, whānau iyo bulshooyinka way is aaminaan iyo ururada dadweynaha.



Yoolkeena ayaa ah inaan siino jawaabo wanaagsan mid walba oo ka mid ah bayaanadaan sida ku saleysan shaqada aan qabaneyno. Xooga jawaabahaan ayaa ka caawineyso cabirida hormarka ku aadan hamiladeena guud (taas oo ah, “dadka, qoysaska, whānau iyo bulshooyinka inay wada kobcayaan”).


Waxaan sidoo kale sameeyneynaa hormarka ku aadan hamiladeena social cohesion inaga oo ka shaqeyneyno sameynta meelaha meesha dadka ku noolyihiin, ka shaqeeyaan, ku ciyaaraan oo wax badan ku bartaan oo badqab, loo dhanyahay iyo taageero leh. Tan ayaa ku jirto shaqada looga dhigayo nidaamyada iyo adeegyada bulshadeena kuwa aad cadaalad u ah oo u suurtagaleyso ka jawaabida baahiyada iyo arrimaha kala duwan.

Qorsheynta iyo diyaarinta waxay muhiim u tahay guusha, taasi waa sababta aan u rabno inaan xooga saarno shaqada social cohesion ama tallaabooyinka oo lix aagag guud:

1. Takoorida ama dadka loola dhaqmayo si gooni ah sababtoo ah qowmiyada, da'da, jinsiga, curyaannimada, galmada ama kala duwanaansho kale
2. Fursadaha wanaagsan ee kooxaha kala duwan ay ugu xirmayaan iyo ugu dhaxgalaan
3. Ka qeybqaadashada howlahaa muhiimka ah sida codeynta, shaqada ama waxbarashada, iwm
4. Fayo qabka iyo caqabadaha fayo qabka
5. Qiyamyada loo dhanyahay iyo la wadaago
6. Uu illaalinta bulshadeena iyo deegaanka jiilka mustabqalka.

Waxaan sidoo kale rabnaa shaqada iyo tallaabooyinka social cohesion ee mid walba ee lixda aag inay hagto afar mabaadi.

1. Hogaamin geesi ah iyo rabitaanka la iskugu dayayo waxyaabo cusub
2. Inay hogaamiso hamiyada iyo baahiyada bulshooyinka
3. Dabacsanaanta iyo qirashada kala duwanaanshaha dadka
4. Xogta ku darista iyo cilmi baarista si wanaagsan u muujiso baahiyada dhabta ah.



Shaqadeena ama tallaabooyinka waa inay sidoo kale hagtaa Te Tiriti o Waitangi, taas oo bixiso aasaas xoogan ee lagu xoojinayo social cohesion ee Aotearoa New Zealand.

Sharfida Te Tiriti o Waitangi ayaa naga caawineyso dhisida aaminaada bulshooyinka si markaas aan u wada shaqeyno si aan u gaarno natiijooyin simman oo cadaalad ah, gaar ahaan lixda aagag ee dirrada oo dhan.

Dhammaantood, dukumintigaan wuxuu sharaxayaa istratejiyada hageyso social cohesion ee Aotearoa New Zealand.

